



Wararkii Ugu Dambeeyey Dugsiga Sarre ee Jefferson, Diisember 2023

Maalintii Tallaadadda ee bisha Diisember ahayd 12ka Golaha Waxbarashadu waxay meel mariyeen QARAAR TIRISIGIISU YAHAY. 6806 kaasi oo faraya Guddoomiyaha Waxbarashada iyo Xafiiska Casriyeynta Dugsiyada inay dib qiimeyn ugu sameeyaan qorshaha dhulka hadda ee Dugsiga Sarre Jefferson, naqshadda dhismaha iyo dadaaladda la xiriira isticmaalka dhulka si aan ardayda Dugsiga Sarre ee Jefferson iyo shaqaalaha loo wareejin doonin goob kale si ku meel gaar ah inta uu socdo dhismaha dib loogu cusbooneysiinayo dugsiga. Tani macnaheedu waxa weeye ardayda Jefferson waxay waxbarashadoodii ku sii qaanayaan sanad-dugsiyedka 2024-25 Jefferson iyo wixii ka dambeeyaa ilaa uu ka dhammaanayo dhismaha cusubi.

Intaas waxaa dheer, kooxda naqshada Dib U Casriyeynta Jefferson waxay dib ugu soo noqon doonaan Golaha Waxbarashada muddo 120 maalmood gudahood iyaga oo soo diyaariyey qorshaha lagu cusbooneysiinayo dib casriyeynta Dugsiga Sarre ee Jefferson. Sida uu qaraarku dhigayo, qorshaha dib u cusbooneysiintu wuxuu noqon doonaa:

- In ardayda iyo shaqaalaha intooda badani ay ku sugnaadaan dhismaha Jefferson inta uu dhismuhu socdo.
- Oo ay ka mid yihiin isdiiwaangalinta ardayda la beegsanayo oo dhan 1,700 arday.
- In la dumiyoo dhismaha 1909 iyo in la dhiso dhismo cusub.
- In la xaqiijiyo la jaanqaadidda barnaamijka tafatirka waxbarashada hadda ee dugsiyada sarre PPS.

Qorshuhu wuxuu sidoo kale ku dadaali doonaa in lagu bixiyo mashruuca maalgalinta lacageed hadda loo hayo(iyo wixii kale loo hayo)ee maalgalin ah iyo wuxuuna tilmaami doonaa miisaaniyada dheeraadka ee la rajeynayo inay ka badato intii markii hore loogu talogalay.

Qorshaha kuma jiri doonaan Xarunta Horumarinta Ardayda Madow, Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman, ama barnaamijyada kale oo aan xidhiidh la lahayn Dugsiga Sarre ee Jefferson.

Go'aanadan ay qaateen Golaha Waxbarashadu waxay ka fal celinayaan jawaab celintii ka soo noqotay bulshada. Xubnaha bulshadu waxay si adag u door bideen in ardaydu wax ku sii dhigato dhismaha dugsiga inta dhismaha lagu wado iyo in la dhiso dhismo cusub oo Jefferson ah halkii la dayn lahaa dhismihii 1909 la dhisay.

Kooxda naqshada dib u casriyeenta Jefferson waxay rajeyneysaa inay kala shaqeysyo bulshada iyo daneeyaasha magaalada qorshaha cusub ee Jefferson. Wuxuu sii wadi doonaa inaan mar walba soo wargalino bulshada wixii horumar laga sameeyo qorshaha. Fadlan la soco wararka ka imanay kooxda horumarka aan ka sameyneyno tallaabooyinka loo baahan yahay in wax ka bedel lagu sameeyo naqshada dhulka.

Si aad u daawato wada hadaladii Golaha ee Diisember 12keedii dhacay iyo qaraarkii loo codeeyey halkan kala soco (wuxuu bilaabmaya 1:06:00)

<https://youtu.be/ZfKJOftHySU?si=Abk9IujWsHalQt2P>

Waxaad halkan ka arki kartaa qaraarkii Golaha oo dhammeystiran

<https://meetings.boardbook.org/Public/Agenda/915?meeting=612536>